Nadiif iyo amaan ku haynta sakaddada
Keeping your Block Clean & Safe

Heerarka iyo natiijada

Dawrida heerarka
Ilaaliyihiinu waxaa ka go'an inuu hagaajiyo nooca nolosha kireeystayaasha ayagoo xaqiijinaya in sakadaadu nadiif tahay iyo inay tahay meel aamin ah in lagu noolaado. Ilaaliyayaashayadu waxay rajaynayaan in heerarkooda saraysa inay kugu dhiiri gelindoonto inaad ku caawisid in lagu hayo arrimaha muuqaal fiican.

Waxa ilaaliyihiinu uu qabanayo
Maalinkasta, ilaaliyaha sakadaada wuxuu qabanayaa:

- Buraashid iyo xaaqid deyrka.
- Buraashida kanalka qashinka hoos u qaada iyo nadiifinta qubasho kasta.
- Nadiifinta musqulada caamka ah.
- Ka qaadidda qashinkasta cawska iyo meesha baaburta laga dhigto.
- Buraashida iyo xaaqida wiishka dabaqyada.
- Nadiifinta darbiyada wiishka, biraha iyo meesha albaabku maro.
- Eegida gambaleelka wiishka iyo nalalka.
- Eegidaa in albaabka ka badbaadida dabka inu si quman u xirmayo iyo inaysan tiqraarayn.
- Soo sheegid dayactir maalmeed kasta iyo ciladaha meelaha la wadaago.
- Suubin dayactirka aasasiga ah ee loo baaahdo.

Todobaad kasta, Ilaaliyaha sakadaada wuxuu qabanyaa:

- Buraashid iyo nadiifin dabaqyada iyo biyo mareenada.

- Tirtirida albaabada iyo dariishadaha.
- Buraashida iyo nadiifinta jaran-jarooyinka iyo gacanqabsiyada.
- Nadiifinta iyo ku shubid jeermidile qashinka.
- Eegida armaajooyinka adeegyada inay nadiif ka yihiin qashin.
- Inuu joogo marka la qaadayo qashinka meesha lagu aruuriyo.
- Tirtirid iyo nadiifin biro kasta ee marwaxada.
- Sagxada waxaa kale oo todobaad kasta kormeeraya maamulaha ilaalinta.

Ilaaliyihiinu wuxuu kaloo ku caawinayaa…

- Tusida dadka aaga haddii ku fakarayaan inay u soo guuraan.
- La kulmida kireeyatayaasha cusub iyo tusidooda liiska baaritaanka.
- Ka warhaynta ijaartaha dayacan oo u baahan caawinaad si uu helo adeegyada.
- Hubinta in la helo waraqadaha daabacan ee macluumaadka saxa ah.
- La kulmidda kireeystayaasha iyo shaqaalaha guriyeynta.
- Kaalmaynta kireeystayaasha la kulma akhlaaq xumo ayadoo uu keenayo maragyo dhacdada, u soo sheegida sargaalka kaalmaynta deriska iyo ka qaybgalka maxkamada haddii loo baahdo.
- Kor u qaadida sharafta sakadda iyo muuqaalkeeda ayadoo lagu haynayo hab-nidaamsan aaga la wadaago, dhiiri gelinta kireeystayaasha inay ka qaybqaataan tartanka berida iyo dhacdooyinka kale.

  Xataa haddii ilaalayaashiinu ay fasax jiraan ama ay jiranyihiin, qof kale oo badala baa xanaanaynaya sakadaada. Macluumaad la xiriira arrintaan, wac adeega hawlgabayaashayada ilaalinta guriyeynta ee teleefoonka 0161 227 3003

Fadlan caawiyi

Sakadaha Northwards iyo xaafadda si ay u noqoto meel raaxo leh, aamin iyo dad soo jiidasho leh si loogu noolaado, waxaan subinaynaa kulligayo qaybtayada shaqada.

Fadlan ku caawyi habab kuwaan la mid ah:

- Tixgali deriskaaga.
- Ka takhalus qashinka gurigaaga.
- Ha ku tuurin wixii aanad rabin mareenadda, meelaha la wadaago ama banaanka deyrka.
- Ha ka tuurin waxna deyrkaaga, waliba cunnada soo jiita cayayaanka.
- Musikada ha u yeerin si aad u dheer.
- Ha isticmaalin kanaalad qashinka qaada habaynkii si ayna u dhibin deriskaaga.
- Ha tigraarin ama ha tiirin albaabada dabka.
- Ku caawi xaafaddada inay ahaata mareenadu nadiif iyo habaysanaan.
- Ka helid caawinaad iyo talo ilaaliyahaaga.
- Ha dhigin baabuurkaaga aaga marid deg-dega ama booska curyaamiinta oo aanad xaq u lahayn.

Xiriiro faa’iido badan

Guriyeynta Northwards

Dayactirid, dib-u-dejinta, talo kirada, cabashooyinka iyo caawino kale oo dhan ee guriyeynta, soo wac Northwards teleefoonka 0161 953 2663 Isniinta ilaa Jimcaha 8 subixii ilaa 5.30 galabtii.

Wacida la xiriira bay’adda

Dawlada hoose ee Manchester waxay siisaa adeegyo nooc kasta leh xaafadaada oo ay ka mid yihiin:

- Aruurinta qashinka iyo dib-u-farsamayn.
- Qaadida alaabta waaweyn ee degaanka guriga.
- Wax ka qabashada waxyaabaha la tuuray ee yaacaya.
- Aruurinta irbadha la isticmaalay.
- Dayactir jidadka iyo meesha jidka dadku ka maraan (oo ay ka mid tahay nadiifinta dariiqa).
- Xafididda banaanka.
- Nal galinta dariiqa iyo calaamaynta.
- Aruurinta baabuurta la nacay.

- Midkasta oo ka mid ah adeegyadaan wac teleefoon 0161 954 9000 ama dir Email: www.manchester.gov.uk

Xakamaynta cayayaanka
Adeega xakamaynta ee Dawlada hoose waxay baabi'inayaan lacag la'aan kirada, dooliyaasha, baranbarooyinkka, boodooyinka, kutaanta sarirrta iyo doorshaanta.

Waxaa jira caadi ahaan kharaj lagu qaado cayayaanka kale.
Soo wac teleefoon 0161 234 4928 ama email u soo dir: www.manchester.gov.uk

Baabuurta laga tagay

Boolisku waxay wax ka qabanayaan baabuurta laga tagay. Kula soo xiriir ayaga teleefoon 0161 872 5050 ama soo sheeg baabuurka laga tagay Emayl: www.manchester.gov.uk.

Eyda

Adeega ilaaliyaha eyda ee Golaha Deegaanka wuxuu wax ka qabanayaa eyda baadiyoobay iyo wasaqdooda. Kula soo xiriir ayaga teleefoon 0161 234 4929 ama Emayl: www.manchester.gov.uk.